

‘Beenin hadal kasoo yeeray maamulka ridada Somaliland’

18 Rajab 1444H (09 Febraayo 2023) – Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay si adag u beeninaysaa hadal maanta oo Khamiis ah kasoo yeeray maamulka ridada ah ee isku magacaabay Somaliland, kaas oo wasiir u hadlay uu sheegay in ay magaalada Laascaanood kula dagaalamayaan Mujaahidiinta Al-Shabaab. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay xaqiijinaysaa in hadalka kasoo yeeray maamulkaas ridada ah uu yahay mid aan sal iyo raad lahayn.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ma aqbalayso in magaceeda laga dhigto marmarsiyo lagu banaysto nafta, maalka iyo sharafta bulshada reer Laascaanood, wuxuuna maamulka ridada ah ee isku magacaabay Somaliland doonayaa inuu eedeymahaas been-abuurka ah kaalmo uga helo gaalada caalamka, si ay ugu taageeraan gumaadka uu ku hayo bulshada Laascaanood.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay mar kale cadaynaysaa inaysan wax lug ah ku lahayn dagaalka ka socda Laascaanood, isla markaana aysan jirin ciidamo Al-Shabaab ah oo ka qayb qaadanaya dagaalkaas, waxayna ugu baaqaysaa cid walba oo ay arintani qusayso inaysan ku kadsoomin been-abuurka kasoo yeeray maamulkaas ridada ah.



﴿ وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾